



OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

Tilmaamaha Farshaxanka Beeraha Nasashada ee 2027

CODSIYU WUU FURAN YAHAY: Sabteembar. 15, 2026

CODSIYU WUU XIRAN YAHAY: Oktoobar. 27, 2026, 5 PM Waqtiga Pasifikada

Dulmarka Deeqaha

Xafiiska Farshaxanka & Dhaqanka (OAC) iyo Beeraha Nasashada & Madadaalada ee Seattle (SPR) waxay ku casuumayaan farshaxaniinta gaarka ah, shaqaalaha hal-abuurka, kooxaha bulshada, iyo ururada inay soo bandhigaan mashaariic diiradda saaraysa firfircoonida farshaxanka iyo dhaqanka ee beeraha nasashada ee ay maamusho Magaalada Seattle dhaxeenteeda Maajo iyo Oktoobar 2027.

Wixii macluumaad ah iyo caawinta codsiga, baahiyaha helitaanka, ama jawaab-celinta qabyo-qoraalka codsiga, kala xiriir **Zach Frimmel, Maareeyaha Mashruuca Deeqaha, 206-963-9226** ama Zach.Frimmel@seattle.gov.

Waxaan noo jooga turjubaano kugula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Kaliya na soo wac oo noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Fadlan sug qaddar yar inta aanu raadineyno turjubaan ku soo biira wicitaanka.

Codsiga (Arjiga)

[Ku Codso qaabka Khadka](#) iyadoo la adeegsanayo bogga deeqaha ee Magaalada Seattle.

Haddii aadan haysan kumbiyuutar ama internet, fadlan la xiriir shaqaalaha sida ugu dhaqsaha badan.

Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

Talaado, Oktoobar. 27, 2026, 5 PM Pacific

U-qalmitaanka

Waxa aad xaq u leedahay inaad codsato deeqdan haddii aad buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxaad tahay shakhsi, urur, ama koox bulsho oo soo bandhiga firfircoonida farshaxanka iyo dhaqanka ee Seattle ugu yaraan hal mar sannadkii.
- Waxaad leedahay cinwaan deegaan ama ganacsi ama istuudiyaha/goob shaqo oo joogto ah oo ku qoran magacaaga, gudaheeda Ismaamulka King (ama Ismaamulka King ee aan magaalada ahayn), halkaas oo aad ku meelaha boostada. Ma noqon karto P.O. Box.

Waxaad adeegsan kartaa aaladan raadinta [si aad u aragto inay cinwaankaagu u qalamo iyo in kale](#).

- Waxaad haysataa lambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Federaalka (Social Security Number, ITIN, ama Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha).

Waxa aadan u qalmin deeqdan haddi:

- Waxaad leedahay qandaraas furan oo Arts in Parks ah ka dib Diseembar 31, 2026.
- Waxaad aqbashay maalgelinta Magaalada Seattle ee isla mashruuca/kharashyada ah. Tani waxay ku jiraan deeqaha kale ee OAC ama SPR.
- Waxaad heshay oo aad aqbashay deeqda 2027 ee Get Moving, ama Recreation For All, ama Hope For Youth ee SPR.

Maalgelinta

Waxad codsan karta **\$2,000-\$8,000**.

Kulamada Macluumaadka

Wax badan ka baro deeqdan iyo sida loo gudbiyo arjigaaga ugu wanaagsan. Waxaan dhiirigelinaynaa dadka markii ugu horreysay codsanaya inay ka soo qaybgalaan.

Kalfadhiga 1-aad - Onlayn (Khadka Tooska Ah)

Isniin, Sabteembar. 21, 4-5:30 PM Waqtiga Basifikada

Onlayn: Microsoft Teams

[U jawaab Sabteembar 21](#)

Kalfadhiga 2-aad - Goobta/Qof Ahaan

Khamiis, Oktoobar. 8, 6-7:30 PM Waqtiga Basifikada

Qof ahaan: Garfield Community Center

[U jawaab Oktoobar 8](#)

Dib-u-eegista Qabyo-qoraalka Codsiga

Waxaad soo gudbin kartaa hal codsi oo ku saabsan jawaab-celinta hal qayb oo ka mid ah codsigaaga ka hor inta aadan gudbin. Ku soo gudbi codsiyadaada iimayl ahaan

Zach.Frimmel@seattle.gov marka ay tahay Talaado, Oktoobar 6, 2026.